



SOMALI

Marwo Deirdre P. Pierce, Guddoon Guddiga
Gabar Allyson Gevertz, Ku xigeenka Guddoonka
Mudane Andrew B. Ziffer
Marwo Whitney McGinniss
Dhaqtar Tiffany Tate-Hogan
Mudane Dijon DaCosta, Sr.
Mudane Awet Eyasu

Dhaqtar Devon Q. Horton, *Kormeeraha guud*

WIXII FASAXID DEGDEG AH

Aabriil 1, 2025

Xiriirka:

Donald Porter, *Ed.D.* 678-481-4110
Carla Parker 404-734-1717

18 Ardayda sannadka afaraad ee DCSD Ayaa Loo amaanay sida Aqoonyahanada Georgia ee Fasalka 2025

(STONE MOUNTAIN, GA) – Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb (DCSD) ayaa si sharaf leh ugu dhawaaqay in 18 ardayda sannadka afaraad ee DCSD ah lagu sharfay sida Aqoonyahanada Georgia ee Fasalka 2025. Waaxda Waxbarashada Georgia (GaDOE) ayaa siidaayay liiska maanta, iyagoo aqoonsanaya ardaydaan gaarka ah ee ka mid ah 145 lagu sharfay gobolkoo dhan. Sida ka qeyb ah guushaan qaaliga ah, Aqoonyahan walboo Georgia ah wuxuu ku helayaa shaabad gaar ah dibloomadooda iyo xariga qalin jabinta xuska.

“Aad ayaan ugu faraxsannahay inaan aragno in ardaydeena ay ku wanaagsanyihiin heerka gobolka,” Kormeeraha guud ee DCSD Dhaqtar Devon Q. Horton ayaa yiri. “18 kaan hogaamada da’da yar waxay muujiyeen karti tacliimeed oo cajiib ah, ka go’naanta bulshadooda, iyo dabeecad ku dayasho mudan inta ay ku jireen safarkooda dugsiga sare. Waxay muujiyeen kuwa ugu fiican Gobolka DeKalb, oo waxaan rajeyneynaa inaan aragno dhammaan guulaha cajiibka ah ee mustaqbalkooda hayo.”

Barnaamijka Aqoonyahanka Georgia wuxuu aqoonsadaa oo uu sharfaa ardayda sannadka afaraad kuwaasoo kobcay tacliin ahaan oo si weyn gacan uga geystay bulshadooda. Ardaydaan waxay dhameystireen koorsooyin badan oo adag, iyagoo soo bandhigay heerarka ugu sareeyo oo maadooyinkoo dhan ah, waxay ka qeybgaleen munaasabadaha dugsiyada, oo waxay u adeegeen sida hoggaamiyayaasha howlaha manhajka dhaafsan. Iyadoo la kaashanayo degmooyinka iyo dugsiyada deegaanka, GaDOE waxay xiriirsaa barnaamijka sannad walba si ay u tilmaamaan ardayda muujiso ruuxa aqoonyahanka iyo adeega.

Chamblee High School	Ryan	Joshi	Dunwoody High School	Raquel	Espinoza Ramirez
Chamblee High School	Temple	Lester	Dunwoody High School	Brady	McGee
Chamblee High School	Rishan	Muthugomu	Dunwoody High School	Artemis	Misewicz
Chamblee High School	Elena	Smith	Dunwoody High School	Mariana	Roque Queiroz
Cross Keys High School	Hector	Zilli	Lakeside High School	Cole	Jones
DeKalb School of the Arts	Harper	May	Lakeside High School	Anna	Katz
DeKalb School of the Arts	Sophia	Ocfemia	Miller Grove High School	Meti	Kejela
DeKalb School of the Arts	Lauren	Williams	Miller Grove High School	Swayam	Rathod
Dunwoody High School	Clara	Cann	Tucker High School	Rebecca	Larkin

Liiskoo dhameystiran ee Aqoonyahanada Georgia 2025 waa [HALKAAN](#). Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan barnaamijka Aqoonyahanka Georgia, fiiri [HALKAAN](#).

XXX